



Mahadnaq aan u direyno qoysaska: Qoraal kooban oo ku saabsan waxyaabaha soo socda marka la soo gaaro dhammaadka sanad-dugsiyeedka

Juun 11, 2021

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Iyada oo la soo gaaray dhammaadkii sanad-dugsiyeedkii aan hore loo arag, waxaan rabnaa inaan idiinka mahadnaqno sabrikiina, dabacsanaantiinii iyo fahamkii aad idinka iyo ardaydiinuba aad nala wadaagteen.

Maadaama xilligii fasaxa xaggaagu inagu soo dhawaaday, fadlan todobaadka soo socda waxaad ka raadsataan buug-gacmeed dhan oo koobaya kuna saabsan barnaamijyada xilliga xaggaaga oo aad ka heli kartaan iskuuladeena, oo ay ka mid yihiin farshaxanka, daryeelka xannaanada caruurta, kobcinta, STEM (sayniska, teknoolijiga, injineerinka, xisaabaadka), iyo barnaamijyada shaqo-abuurka dhallinyarta.

Marka la fiiriyo sanad-dugsiyeedka 2021-22, waxaan aad ugu faraxsanahay inaan dhammaan ardayda ku soo dhaweyneyno iskuuladeena maalin dhan, shanta maalmood ee todobaadka, inay qof ahaan iskuulada waxbarashadoodii ku qaadan doonaan, laga bilaabo bisha Sebtember 1deeda. Haddaba todobaadadda soo socda, waxaan si faahfaahsan idiinla wadaagi doonaa qoysaska aan wali diyaarka u ahayn inay ardaydooda u soo diraan iskuulada shaqsi ahaan sidi ay waxbarashadooda ugu qaadan lahaayeen ikhtiyaaraadka muuqaalka waxbarashada ay guryaha ku qaadanayaan sababo caafimaad awgood ama caqabado kale oo jira darteed.

Fadlan waxaad la socotaan macluumaad dheeraad ah oo aan si degdega ah u soo saari doono, sidoo kale waxaan idiin rajeyneynaa fasaxii xaggaaga oo aad ku qaadataan nabadgelyo.